



## Intii aynu maqnayn: Jason Lee wuxuu ku guuleystay abaalmarin loogu talagalay caafimaadka; Seth Curry oo ka socda Blazer wuxuu taageeraa ardayda; iyo kuwo dheeraad ah

PPS Pulse wuxuu hakad gelay laba toddobaad oo loogu talagalay fasaxa gu'ga, laakiin hawlaha ka jira degmadeenu way sii socdeen ka hor iyo ka dib fasaxa. Qaar ka mid ah waxyaabaha dhacay tan iyo soo saaristii la soo dhaafay:

**Jason Lee oo la aqoonsaday:** Dugsiga Hoose ee Jason ayaa noqday mid ka mid ah saddex dugsi oo ku yaala gobolka si ay u helaan Abaalmarinta Fayo qabka Dugsiga Oregon ee 2018-19 oo ka socota Waaxda Waxbarashada ee Oregon. Abaalmarin sharafeedka "oo ah dadaalada wanaagsan ee lagu wanaajinayo caafimaadka carruurta iyo sameynta xiriir ka dhexeeya nafaqada, dhaqdhaqaaqa dhanka jirka, iyo guusha tacliimeed."

Wakiilo ka socda ODA iyo Oregon Dairy iyo Nutrition Council ayaa abaalmarin dhan \$2,500 siisay Maamulaha Isaac Cardona iyo shaqaalihisa iyada oo la joogo xafladdii Jimcaha.

Maamulaha Cardona wuxuu dhaqdhaqaaqa dhanka jirka ku daray qaybo kala duwan oo ka tirsan maalin dugsiyeedka. Wuxuu deeqda lacageed u isticmaalay in ay shaqaaleysiiso laba macallimiinta waxbarashada jirka ah, taasi oo dugsiga u saamaxaysa in uu yeesho fasallada qoob ka ciyaarka iyo PE oo jooto ah. Hal faa'iido waxay ahayd in dugsigu hoos u dhigay tirada ardayda wax laga reebayo 'exclusions' (oo sidoo kale loo yaqaan iska joojinta 'suspensions') laga bilaabo 103 shan sano ka hor isaga oo ka dhigay in aanay jirin arday wax laga reebay sanadkani.

"Waxaanu u isticmaalnay dhaqdhaqaaqa dhanka jirka hab carruurta tamarta badan ee ku jirta lagaga saaro," ayuu sheegay Cardona.

Dugsigu wuxuu soo bandhigaa Maylka Subaxdii "Morning Mile" Jimce kasta 7:30 subaxnimo, markaasi ay ardayda iyo waalidiintu ay ordaan ama socdaan mayl ka hor dugsiga.

"Waalidiintu waxay jecel yihiin in ay la tallaabsadaan/socdaan carruurtooda ka hor inta uusan dugsigu bilaabmin," ayuu sheegay Cardona. ([Fiiri sawirro badan oo ka socda Maylka Subaxdii 'Morning Mile' ee toddobaadkii la soo dhaafay](#))

Dugsigu wuxuu sidoo kale bilaabayaa barnaamijyo u oggolaanaya shaqaalaha iyo waalidiinta in ay ku lug yeeshaan dhaqdhaqaaqa dhanka jirka, oo ay ku jiraan fasallada yoga oo loogu talagalay waalidiinta SUN, iyo daryeelka carruurta si loogu oggolaado waalidiinta in ay ka qayb qaataan naadiga orodka.

Jason Lee waa dugsigii lixaad ee ka socda Dugsiyada Dadweynaha Portland oo ku guuleysta abaalmarinta, oo soo bilaabantay 2008-kii. Ku guuleystayaashii hore ee PPS ka tirsanaa waxay ahaayeen Dugsiga Hoose ee Abernethy, 2007-08; Sabin K-8, 2010-11; Dugsiga Hoose ee James John, 2011-12; Dugsiga Sare ee Benson, 2012-13; iyo Dugsiga Dhexe ee Robert Gray, 2014-15.

**Seth Curry oo taageeray ardayda:** Ciyaartoyga Portland Trail Blazers difaaca uga ciyaara Seth Curry ayaa taageeradiisa u muujiyay ardaydeena isaga laba jeer u yimiday.

Bishii Maarso 21, Curry wuxuu aaday Dugsiga Sare ee Cleveland si uu u booqdo fasalka macallinka waxbarashada gaarka ah ee Dominic LeFave, oo sidoo kale ah tababaraha kubadda kolayga ee Olympic-ada Gaarka ah. Ardayda LeFave iyo xubnaha kooxda ayaa fursad u helay in ay la kulmaan isla markaana sawir la galaan Curry. ([Fiiri sawirro ka socda booqashada](#))

Maalintii xigtay, Curry wuxuu aaday Dugsiga Dhexe ee Lane si uu ula kulmo macallimada ardayda AVID ee Lisa Coffman. Ardaydu waxay qayb ka yihiin barnaamij loo yaqaano "Venture: Oo ah Hal-abuurnimo Ganacsi," kaasi oo ay abuuraan ganacsiga cuntada baabuurka lagu gado oo u gaar ah. ([Fiiri sawirro ka socda booqashada](#))

**Bandhiga Dhaqamada kala duwan ee Harrison Park:** Dugsiga Southeast Portland K-8 wuxuu Maarso 21 qabtay dhacdo sanadeedkiisii. Waxaa lagu soo bandhigay bandhigyo badan oo lagu muujiyay dhaqamada kala duwan ee ardayda taasi oo 2017-18 boqolkiiba 27 ahaayeen dad Aasiyaan ah, boqolkiiba 22 waxay ahaayeen dad Madow iyo Maraykanka Madow, iyada oo boqolkiiba 19 ay ahaayeen Hisbaanik. ([Fiiri sawirro ka socda dhacdada](#))

**Kooxaha qalabka iswada 'robotics' ee Grant, Cleveland oo hore u gudbay:** Kooxda qalabka iswada 'robotics' ee Dugsiga Sare ee Grant ayaa markii u horreysay boos ka helay Horyaalka FRC Pacific Northwest, iyaga oo guul ka soo hooyay dhacdadii degmada ee lagu qabtay dugsiga Machadka Clackamas oo ku yaala Oregon City. Guushu waxay tii u horreysay ee Generals, oo la aasaasay sanadkii 2011.

Kooxda Grant, oo uu tababaray Alex Luboff, waxaa ku soo biiray Pigmice, kooxda ka socotay Dugsiga Sare ee Cleveland, ee Horyaalka Pacific Northwest oo toddobaadkii la soo dhaafay ka dhacay Tacoma Convention Center. Pigmice, oo ay tababartay Cindi Carrel, waxay sidoo kale sanadkii la soo dhaafay u tartameen gobolka, markii lagu qabtay Memorial Coliseum, iyaga oo u tartamay Horyaalnimada Adduunka ee 2016-ka.

**Beerida dhirta oo ka dhacday dhismaha Marshall.** Ardayda Dugsiga Sare ee Grant waxay ka tegi doonaan Dugsiga Sare ee Marshall – oo gurigooda ku meel gaarka ah muddo laba sanadood ah inta lagu jiro dhismaha xaruntooda gaarka ah – dhammaadka sanad dugsiyeedkani, laakiin waxbay uga tageen dadka degi doona dhismaha Southeast Portland: geedo cusub.

Qiyaastii 18 ardayda Grant ah oo ka socota fasalka macallinka Sayniska Deegaanka ee Walt Holland, oo caawimaad ka helaya tabaruce ka socda Waaxda Dhirta, ayaa toddobaadkii la soo dhaafay shan geed ka ku beeray dhismaha Marshall. Ka dib marka ay ardayga Grant tegaan, arday ka socota Madison ayaa u soo guuri doona Marshall muddo laba sanadood ah iyada oo ay xaruntoodu uu ka socdo dhisme lagu casriyeynayo xarunta.

Dadaalka ay wax ku beerayso ardaydu wuxuu qayb ka ahaa beerida 30 geed oo lagu beeray dhismaha Marshall iyada oo ay beereen Beeraha Nasashada & Raaxada Portland qaybtooda Dhirta Magaalooyinka. Waaxda Dhirta Magaalooyin waxay dhir beerid ka sameysay dugsiyo kale waxayna sida caadiga isku daydaa in ay bixiso fursado ay ardaydu kaga qayb qaataan. ([Fiiri sawirro ka socda beerida dhirta](#))